

Xeer Madaxweyne J. 28 Decembar 1963, lamba. 331

Burinta tacriifadaha adeegyada qalliinka-caafimaadka iyo khidmadaha cusbitaalka ee laxiriiro qaybta aan hodanka ahayn.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Markuu arkay qod. 75 ee Dastuurka Jamhuuriyadda;

Markuu arkay Sharciga 3 Juun 1962, lamba. 14, Sharciga Dowladda;

Markuu arkay Xeer-Sharci lamba. 158 ee 10kii Oktoobar 1953 “Khidmadaha isbitaalka iyo qiimaha adeegyada qalliinka ee xarumaha caafimaadka”;

Markuu tixgelinayna inay lagama maarmaan tahay in la baabi'iyay qiimaha adeegyada qalliinka-caafimaadka iyo khidmadaha isbitaallada iyadoo loo eegayo qaybta dadka saboolka ah si waafaqsan Xeerka Sharci ee aan soo sheegnay;

Markuu Dhageestay Golaha Wasiirada;

Marka uu tixgeliyay soo jeedinayo Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka, Xanaanada Xoolaha iyo Shaqada, oo heshiis la ah Wasiirka Maaliyadda;

Wuxuu Xeeriyay

Qod. 1

Laga bilaabo 1 Janaayo 1964, waxaa la baabi'iyay khidmadaha isbitaalka ee qaybta ay bixiyaan dadka saboolka ah ee lagu tilmaamay qod. 2 ee xeerka lamba. 158 ee 10kii Oktoobar 1963kii.

Sidoo kale waxaa la buriyay isla qaybta qiimaha adeegyada caafimaadka-qalliinka iyo adeegyada bukaan-socodka ee dadka saboolka ee ku xusan qod. 4 ee isla xeerka oo ku tixan lifaaqa marka laga reebo kuwa loo go'aamiyay falanqaynta bukaan-socodka ee lagu sheegay xarafka X ee isla tabeelaha, kuwaas oo dhaqangal sii ahaanaayo ayadoo aan lala simeynin, sabab kastooy tahay xaaladdu, dabaqyada qaybta wax haysata, kuwa aan haysanin iyo kuwa saboolka ah.

Qod. 2

Xeerkan ayaa dhaqan galayo maalinta lagu soo saaro faafinta rasmiga ah waxaana lagu dari doonaa ururinta shuruucda iyo go'amada rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Somalia.

Cid kasta oo mas'uul ah waxaa ku waajib ah in ay ilaaliso oo ay ilaaliso sida sharciga Jamhuuriyadda.

Muqdisho, Decembar 28, 1963.

Aden Abdulla Cismaan

Ra'iisul Wasaare

Cabdi-Rashiid Cali Shermarke

Wasiirka Xanaanada Xoolaha iyo Shaqada ee Caafimaaadka

Maxamud Axmed Maxamed Addan

Wasiirka Maaliyadda

Abdulcadir Mohamed Aden